



ismaamulka san diego



**waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtadaa si**

**loo ilaaliyo
marinadeena biyaha**



20DISEEMBAR2016



BMP-yada miirista

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **kahortaga maadooyinka wasaqda ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.

BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyheena

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirkka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.

Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan BMP ka miirista biyaha ee dhismahaaga. Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya waraaqdaan si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayo.



Sida BMP-kaaga Miirista biyaha uu U shaqeeyo

BMP-yada miirista waxay biyaha daadka ku leexiyaan meelaha ay biyaha liqi karaan ciida ku xeeran aaga. Waxay adeegsadaan miiraha dabiciiga ah si qashinka looga saaro biyaha daadka loona yareeyo xawaaraha biyaha daadka ee galaaya nidaamka biyaha roobka. Aaladaha miirista ayaa ka sarayn kara dhulka, ayagoo ah tajeeyo ama aagag miireyaasha jaayga loo adeegsado, ama waxaa lagu xiraa hoosta meelaha la maro. Caadiyan agabka miirista ayaa ah kuwo qalalan marka laga reebo xiliyada roobka badan.

xog dheeraad ah > > >



ismaamulka san diego



waad ku mahadsan
tahay samaynta
qayptaada si

loo ilaaliyo
marinadeena biyaha



20DISEEMBAR2016

BMP-yada miirista

Hel oo Hayso BMP-gaaga



Si aad u hesho aalada miirista ee gurigaaga, raadi meelaha ay biyuhu ku aruuraan kadib marka roobku da'o, sida ugu badan meelaha jeexyada cawska ama jaaygu ka buuxo.

Marka aad hesho aaladaada miirista, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta aalada miirista biyaha xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **Ka saar qashinka ama wasaq kasta oo ku aruurtay.**
- **Jar cawska sida xad dhaafka ah u baxa kahor xili roobaadka (Oktoobar 1 deeda ilaa Abril 30 keeda).**
- **Badel dhoobada biyuhu qaadeen ama xumaatay.**
- **Biyo raaci qaruuraxa ku xirmay meelaha la maro. Biyaha dhaqmada haku siidayn kanaalka roobka. Ku leexi biyaha dhaqmada aaga geedaha leh.**
- **Dayactir ama badel qaruuraxa waxyeeloobay ee BMP-ga.**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Sanad kasta Barnaamijka Difaacaha Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaya foomka xaqijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP-gaaga.

Ku fashilmida samaynta dayactirka dhammaan BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.



Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir:

Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcountry.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater